RESET
Training and Support

**Khabiirada oo Khibradda leh: Khadar oo qaadanaayo shatiga baabuur wadista**

Akhriso wax ku saabsan khibrada khadar ee wax ku baranaayay imtixaankiisa baabuur wadista iyo sida lahaansha gaariga saameeyn ugu yeeshay nolosha qoyskiisa.

Lahaanshaha gaariga wuxuu muhiim u noqon karaa madax-banaannidda qoyska, gaar ahaan meelaha halkaas oo gaadiidka dadweynaha uu xaddidan yahay. Sikastaba ha ahaatee, helidda shatiga baabuur wadista ee UK wuxuu noqon karaa qaab adag oo dheer. UK waxay leedahay [mid ka mid ah mabda imtixaanada ugu adag ee aduunka](). Tani xitaa waa mid aad loogu baahan yahay haddii Ingiriisiga uusan ahayn luuqaddaada koowaad. England gudaheeda, Wales iyo Scotland mabda imtixaanka keliya waxaa lagu qaadan karaa Ingiriiisiga.

Tani waxay ahayd mid ka mid ah caqabadaha ugu muhiimsan ee Khadar xooga saaray markaan la fadhiisanay isaga si aan ugu hadalno khibradiisa baabuur wadista ee UK. Kooxda Bath Soo dhoweynta Refugees Community Sponsorship waxay Khadar iyo qoyskiisa ku soo dhoweeyeen UK sannadkii 2021. Markii uu imaaday Bath, Khadar wuxuu lahaa sannado badan ee khibradda baabuur wadista isaga gadaashiisa ah, isaga oo horey ugu soo shaqeeyay daroowlnimo ahaan ee HGV. Sidaas darteeda, isaga wuxuu aad u go'aansaday inuu helo shatiga UK iyo warqadda khibradda baabuur wadista si uu u taageero qoyskiisa. Xilliga wadashekeysigeen, Khadar waxaan ka wada hadalnay caqabadaha barashada ee mabda imtixaanka oo wuxuu sharxay sida lagu helaayo shatiga baabuur wadista ay u bedeshay nolol maalimeedka qoyskiisa oo isla markaana saameeyn ku yeeshatay qorshahiisa mustaqbalka iyo rajooyinkiisa shaqo.

Akhrso wareysigeenna hoose ee isaga aan la yeelanay si aad wax badan ugu ogaato.

**Maxay ahayd khibradaada waxbarashada iyo ku guuleysiga ee imtixaankaaga baabuur wadista?**

Barashada mabda baabuur wadista waxay ahayd khibrad adag bilowga ugu horeeya sababtoo ah ee luuqadda darteeda. Laakiin waa in la sameyaa sababtoo ah kuma wadi karin baabuur shati la'aan ee gudaha UK. Taasi waxaan geliyay maskaxdeyda, oo runtii si adag ayaan u shaqeeyay si aan u barto, ee ugu danbeyntii iyo nasiib wanaagii, waxaan ku guuleystay mabda iyo imtixaanka wax ku oolka ah. Waxay igu qaadatay sideed isku deyo ah si aan ugu guuleysto mabda imtixaanka ah, laakiin waxaan u baahnaa keliya inaan qaato baraatikada hal mar si aan u baaso Aniga aad baan ugu faraxsanahay inaan ku baaso.

**Sidee buu u dhacay imtixaankii wax ku oolka ahaa? Horey waxaad anaga noo sheegtay inaad leedahay khibrad aad u fara badan oo ah baabuur wadista ee shaqadaadii hore darawalnimo ahaan ee HGV.**

Wax dhibaato ah kuma qabin aniga imtixaanka baraatikada. Waxaan u arkay inay aad iigu fududeed, maadaamaa aan soo kaxeynaaye baabuurta muddo dheer. Imtixaan qaadaha ee imtixaanka baabuur wadista ee aan lahaa waxaa lagu yaqaanay inuu ahaa qof si gaar ah u adag in laga gudbo. Laakiin nasiib wanaag waxaan weli maamulay inaan si fudud ugu guuleysto imtixaanka. Runtii waxay ahayd maalin farxad ah, laakiin waxan ka sii farxad badnaa marka aan ku baasay imtixaanka qoraalka ah. Waan hubay

inaan ku baasi doono imtixaanka baraatikada sababtoo ah waxaan u leeyahay khibrad aad u wanaagsan ee goobtaan.

**Maxay u noqon doontaa taladaada dadka kale baranaya imtixaankooda mabda baabuur wadista?**

Dib u fiirinta, inaad ku barato nuxurka mabda luuqaddaada koowaad ma ahan mid aad kuu caawineysa. Sidaas darteeda aniga ahaan, inaad ku barato mabda Carabig ahaan ma ahan mid marwalba aad waxtar u leh. Waxay wanaagsan tahay inaad ku barato iyada markii hore Ingiriisiga, haddii Ingiriisigaagu uusan ahayn mid heer sare ah. Sheyga ugu fiican loo sameeyo dadka aan ku hadlin Ingiriisiga waa inay sii wadaan ku celcelinta ayaga oo isticmaalaya DVLA website kaas oo ah Ingiriisiga.

Waxay leeyihiin dib u eegis imtixaanka mabda ah iyo qaybta baraatikada, imtixaanada baraatikada iyo mabda oo ah app-ka imtixaanka ogaanshaha meelaha halista ah. Tani waxay aad muhiim ugu tahay dadka aan ku hadleynin Ingiriisiga luuqadooda koowaad ahaan. Waxaan la wadaagay xariirkani dadka kale oo waxayna sidoo kale maareeyeen inay ka gudbaan mabda imtixaanka iyaga oo ugu mahadcelinayaan qalabkaani.

**Ma jiraan barnaamijyo kale oo ah kumbiyuutar ama app-yada taleefoonka oo kaa caawiyay barashada sharciyada baabuur wadista?**

Waxaan soo iibsaday barnaamijka kombiyuutarka ah kaas oo aan u isticmaalaayay inaan ku barto nuxurka maadada sharxaayo, kaas oo yahay qiimahiisa £80. Kaasi wax badan ayaan ku celceliyay. Waxaan sidoo kale isticmaali jiray imtixaanka loo turjumay Carabiga oo ahaa Ingiriisiga. Markii aan u fahmay dhammaan sharciyada Carabig ahaan, waxaan isku day markale iyo markaleba ingiriisi ahaan. Runtii si adag ayaan iskugu dayay, oo ugu danbeyntii waan maareeyay inaan ku baaso.

**Sidee baabuur wadista ay kugu caawisay isdhexgalkaaga bulshada iyo nolosha Bath?**

Baabuur wadista ayaa runtii wanaajisay isdhagalkeena iyo awooda aan ku degnay bulshada iyo helitaanka adeegyada dadweynaha aan u baahan nahay si aan u helno. Lahaanshaha gaariga ayuu ahaa mid aad waxtar ugu leh isdhexgalka sababtoo ah waxaan u sameeyn karaa waxyaabo badan carruurteyda. Lahaanshaha gaariga ayuu ahaa mid si gaar ah ugu fiican carruurta. Runtii way fiican yihiin oo xitaa runtii way ku raaxeysteen xagaaga wax badan sababtoo ah gaariga dartiisa. In badan ayaan u qaaday beerta iyo waxaan geeyay xeebta marar badan xilliga lagu guda jiray xagaaga oo wayna jeclaadeen. Runtii way faraxsan yihiin. Sidoo kale hadda way noo fududahay anaga haddii aan rabno inaan aadno meel halkaas oo aan lahayn gaadiidka dadweynaha oo fiican. Hadda waan u qaadi karaa carruuteyda si ay u booqdaan carruurta kale oo aagga ku nool.

Gaariga sidoo kale wuxuu aad muhiim ugu ahaa inaan u qaado carruurteyda ballamaha caafimaadka. Gabadheyda waxay qabtaa cudurka biyaha indhaha oo waa inaan u qaadnaa wax badan isbitaalka ku yaala Bristol. waxaan ka qaybgalnaa ballamaha joogtada ah ee dhakhtarka halkaas, oo waxaan kala soconaa waxyaabo kala duwan dhakhtarka waqti ka waqti.

Qaab kale gaariga wuxuu isbeddel fiican oo kala duwan ku sameeyay wax waaye dhaqaale ahaan. Tusaale ahaan, Haddii aan rabo inaan la aado bartamaha magaalada carruurteyda, waxay igu kici lahayd aniga wax badan si aan ula baxo dhammaan qoyska gaadiidka dadweynaha. Waxaan isticmaali jiray inaan qaato tagsi ama bas, oo tani waxay noqon kartaa mid aad qaali u ah. Hal safar oo aan la aado bartamaha magaalada carruurteyda gaadiidka dadweynaha waxay igu kici lahayd isla lacagtii shidaalka muddo labo toddobaad ah.

**Baabuur waditaanka saameyn miyay ku yeelatay miisaaniyaddaada?**

Way i caawisay dhaqaale ahaan meelaha qaarkooda laakiin waxaa ku darsamay kharashaad cusub kuwa kale. Bixinta ceymiska gaariga wuxuu noqon karaa lacag aad u badan. Sidoo kale sida aan u wado muddo woqti ah marka uu jiro kharashka dhibaato nololeedka; guud ahaan xaaladeyda dhaqaale ma fiicneen.

Waxaan xoogaha la halgameynaa sababta ay tahay kharashaadka nolosha ay kordheyaan iyo waxyaabaha kale waxay noqonayaan mid aad qaali u ah. Si kastaba ha ahaatee, gaariga wuxuu ii sameeyay isbedel weyn sababtoo ah taas micnaheeda waxaan heli karaa dukaamo ee kala duwan. Tusaale ahaan, inta aan ku baasing imtixaankeyga, markii aan u baahnaa inaan aado Bristol si aan u soo qaato hilibka xalaalka ah ama wax kale, waxaan u baahnaan lahaa inaan bixiyo ku dhowaad £80 oo tagsi ah si aan ugu safro uguna soo noqdo, sababtoo ah waxaan nahay qoys weyn. Taasi waxay noqon lahayd kharash badan. Sidaas darteeda lahaanshaha gaariga ee xaaladaan lagu jiro isbedel weyn ayay sameyneysaa. Hadda keliya waxaan u baahannahay qiyaastii inaan bixiyo £7 oo shidaal ahaan ah si aan ugu aado laga soo bilaabo Bath ilaa Bristol. Waxay sidoo kale ii sahleysaa inaan ka qaybgalo ballamaha muhiimka ah ee carruurteyda. Tagsiga runtii waa qaali, sidoo kale lahaanshaha gaariga wuxuu na siineyaa sidoo kale fursad aan ku keydino lacag. Waxaan u safraa Bristol wax badan sidoo kale waxaan jeclahay inaan dukaameysigeyga halkaas ka soo sameysto. Dukaamada ee ku yaala Bath waxay noqon karaan kuwa qaali ah.

**Waa maxay qorshayaashaada ee mustaqbalka?**

Waxaan ku daaleyaa sidii aan ku heli lahaa shaqo xilligaan. Waxaan hadda codsaday inaan noqdo darowal kaxeeya baska, maadaamaa hadda aan ku baasay mabda iyo imtixaanka baraatikada baabuur wadista. Waxaan jeclaan lahaa inaan noqdo bas darowal bas sidaas awgeed si aan u taageero qoyskeyga.

*Khadar aad baad u mahadsantahay!*